Kooxda hagidda guriga ee qoysaska leh carruur naao ah
Lambarka taleefanka: 47 49 51 19

Adreeska / Goobta lagu booqdo:
Holmlia senter vei 9, 4. etasje
1255 Oslo

Oslo

Degmada Søndre Nordstrand

# Kooxda hagidda guriga ee qoysaska carruur naafonimo leh (0-18 sano)



Adeeg bilaash ah oo talo-bixin waalidnimo ah oo loogu talagalay qoysaska leh carruur leh naafonimo; tusaale ahaan autismo, ADHD, iyo naafo maskaxeed.

Foto: Ida Rydeng / Oslo kommune

## Waxaan bixinna adeegga:

- Hagid iyo taageero lagu bixiyo guriga
- Wadahadallo taageero ah
- Talooyin wax ku ool ah oo ku saabsan xaaladaha adag ee ilmahaaga
- Caawimaad ku saabsan dejinta iyo dhisidda caadooyin wanaagsan
- Taageero ku saabsan isticmaalka isgaarsiinta, tusaale ahaan sawir-taageero iyo calaamado la hadal (tegn til tale)
- Caawimaad iyo taageero markaad la xiriireyso adeegyada kale



## Ku saabsan adeegga

Waalidiinta leh carruur qabo naafonimo waxay inta badan leeyihiin maalin-maalin ka culus. Talooyinka guud ee waalidnimada mararka qaar ma aha kuwo ku filan. Carruurtu waxay u baahan karaan daryeel dheeri ah iyo caawimaad si ay u horumariyaan xirfado kala duwan..

Kooxda Hjemmeveiledningsteamet waxaa ka shaqeeya khubaro leh aqoon ku saabsan dhowr nooc oo xaalado ah, sida tusaale ahaan autisme, ADHD iyo naafonimada horumarka. Waxaan diiradda saarna is dhexgal-togan, xoojinkta iyo dhirigelinta carruurta iyo waalidkaba. Waxaan sidoo kale bixinnaa taageero loogo talagalay qaraabada iyo dadka ku dhow qoyska..

## Adeeg bilaash ah

Adeegu waa lacag la'aan, waalidka ama qof u dhow qoyska ayaa si toos ah nala soo xiriiri kara haddii la rabo caawimaad. Looma baahno in ilmaha si rasmi ah looga helo xanuun si loo helo adeegga.

Adeggu waxaa la bixi karaa subax, duhur ama fiid – maalmaha isniin ilaa jimce sacaadaha 07:00–20:00.

## Sida baahidda qoyska

Hagida waxaa loo habeeyaa si ay ugu habboonaato baahiyaha qoys kasta. Tusaale ahaan, waxaan bixin karnaa talooyin iyo habab cad oo fududeynaya nolosha maalinlaha ah ee waalidiinta iyo carruurta labadaba.

Hagida waxaa lagu samayn karaa gurigiinna ama xarumahayaga – iyadoo loo eegayo waxa qoyska ugu habboon.

Waxaan sidoo kale ka qaybqaadan karnaa iskaashiga iyo kulamada lala yeesho adeegyada kale.

Hagayaasha (veilederne) waxay leeyihiin waajib sir-ilaalin, waxaana iskaashiga lala yeesho adeegyada kale loo baahan yahay in uu qoyska oggolaado iyada oo loo marayo foom oggolaansho gaar ah.

Waxaan adeegsaneynaa turjubaan marka loo baahdo.

Haddii aad qabtid su'aalo, nala soo xiriir si aan u yeelanno wada hadal fudud oo aan ku sharaxno sida aan kuugu caawin karno.